



Macluumaad ama Xogo ku saabsan tallaalka Covid-19

Tallaalka aasaasiga ah: Waxaa jira saddex tallaalka oo uu Jidhku si fiican uqaadan karo: **Pfizer, Moderna** iyo **Janssen**. **Pfizer** iyo **Moderna** waa inaad qaadataa labo talaal una dhaxaysaa mudo dhan bil halka **Janssen** aad isku talaalayso hal talaal keliya. Talaalka kadib, waxaad haysataa Difaac jidheed oo kugu filan dhana 90% mudo dhoowr bilood.

Tallaalka Sadexaad: waa lagama maarmaan sababtoo ah wuxuu xoojinayaa tallaallada kor ku xusan, gaar ahaan ka-hortagga noocyada cusub ee cudurka, Haddii wax ka badan 4 ilaa 6 bilood ay dhaafeen tallaalkii ugu dambeeyay ee **Pfizer** ama **Moderna**, xoojiye ayaa lagula talinayaa (Pfizer ka 16 sano jir, Moderna laga bilaabo 18 jir). Talaalka sadexaad mar walba wuxuu ahaanayaa talaalkii horay aad uqaadatay noociisa. Haddii aad qaadatay **Janssen**, waxaa lagugula talinayaa inaad qaadatao tallaalka xoojin ah laga bilaabo da'da 18 jir 2 bilood Talaalkii hore kadib.

Marka loo eego waayo-aragnimadii hore, tallaalkada si fiican ayaa loo dulqaadan karaa. Waxaa jira Xanuuno yaryar oo aad dareemi karto tallalka kadib sida: xanuun yar oo ka yimaada goobta la duray, daal, madax xanuun iyo jir xanuun, waxaa suurtoagal ah mararka qaar qandho. Waxaana marar dhif ah imaan kara caabuqa muruqa wadnaha oo si dhaqso ah u bogsada, gaar ahaan wuxuu ku dhicii karaa dadka ka yar da'da 30 sano. Waxyeelooyin daran iyo saamayn mudo-dheer ah ayaan ilaa hadda aana dhicin lamana filayo. Dhibaatooyinkan aan kor kusoo xusnay ayaa aad uga fudud inuu Corona kugu dhaco.

Xitaa haddii talaalku si fiican uga hortago xanuunka, waxaa muhiim ah inaad sii wadato Tallaabooyinka is ilaalinta

Waxaan dooneynaa inaan ugu dambeeyntii ka baxno cudurka faafa oo aan ku soo laabano noloshii caadiga ahayd. Taasi waa sababta aan ugu baahanahay tallaalkada.

Is tallaala! Waxaan rajeyneynaa inaan kugu soo dhaweyno xarunta tallaalka Charlottenfels. Helitaanka talaalku waa mid aad u fudud oo toos ah. Saas darteed isa soo diwaangali.

Mahadsanidin
Kooxda tallaalka Covid-19

Sideen isku tallaali karaa?

Fadlan keen kaarka aqoonsiga, buuga tallaalka (haddii la heli karo) iyo kaarka caymiska caafimaadka.

[Diiwaangelinta joogtada ah ee internetka: sh.ch](https://www.sh.ch)

[Ama iska diwaangeli oo balan ka qabso taleefankan 052 632 65 57](tel:0526326557)

[Tallaalka bilaa diiwaan-gelint ah: MalintaTalaada 5 Galbnimo – 8Fiidnimo](#)
Tani waxay suurtoagal u tahay oo keliya talaalka 1aad iyo 2aad, MAAHA tallaalka Sadexaad!